Your Service
Your Say



# Waxa aanu jeclaan lahayn inaanu war kaa maqalno

**Jawaabcelintaadu** waxay naga caawisaa horumarinta adeegyadeena. Fadlan noo soo sheeg haddii aad hayso **faallo, bogaadin ama cabasho.**

**Xaashida jawaabcelinta**

## Waxa aanu jeclaan lahayn inaanu war kaa maqalno

Waxa aanu rabnaa in aanu ku siino adeegyo aamin ah oo tayo sarreeya si aad u hesho daryeelka iyo daaweynta ugu fiican. Waxa aanu maalin kasta shaqeynaynaa dhisidda adeegyo caafimaad oo sidii hore ka fiican. Waxa aanu jeclaan lahayn inaanu maqalno khibradaada ku aaddan isticmaalka adeegyadeena. Macluumaadka aad na siiso wax baanu ka baran karnaa oo waanu ku sii horumari karnaa.

## Fikirkaaga dhiibo

Waxaad bixin kartaa faallo, bogaadin ama cabasho ayaad soo gudbin kartaa.

### Sida aad noogu sheegayso khibradaada

- La hadal qofka ku siinaya daryeelka ama xubin shaqaalaha ah.
- Iimayl noogu soo dir **yoursay@hse.ie**
- Soo buuxi foomka ku lifaaqan xaashidan.
  - Iimayl ahaan u soo dir ama boostada ugu soo dir HSE Adeegaaga Ra'yigagaaga adigoo raacaya tilmaamaha lagu baxshay foomka.

    **ama**
  - Ku soo celi sanduuqa jawaabcelinta ee yaalla xarunta caafimaadka ee aagaaga.
  - U dhiib qof shaqaalaha ka mid ah.
  - Dalbo oo waydii cinwaan boosta loogu soo diri karo. Waxa aad sidoo kale cinwaankaas ku soo diri kartaa warqad haddii aad rabto.
- Booqo **www.hse.ie/yoursay** si aad u buuxisofoomka  onlaynka ah ee Adeegaaga Ra'yigaaga.
- Adeegaaga Ra'yigaaga HSE si bilaash ah uga wac lambarka **1800 424 555** laga bilaabo 9am - 5pm Isniin illaa Jimce (marka laga reebo fasaxyada ciidaha). Wac +353 1 642 4555 haddii aad joogto Ireland dibadeeda.
- Kooxdeena HSELive ka soo wac taleefanka **1800 700 700** laga bilaabo 8subaxnimo - 8galabnimo, Isniin illaa Jimce iyo min 9ka subaxnimo - 5ta galabnimo maalmaha Sabtida (marka laga reebofasaxyada ciidaha). Soo wac +353 1 240 8787 haddii aad joogto Ireland dibadeeda

### Haddii aadan toos noogu sheegi karayn

Haddi aadan adigu jawaabcelinta na siin kareyn, waxaad ka dalban kartaa qof aad aaminsan tahay, sida qofka qaraabada ah, daryeele ama qareen inuu kuu soo gudbiyo ama kula gudbiyo.

## Maxa dhacaya marka xigta?

**Faallo ama bogaadin**
Haddii aad hayso faallo ama bogaadin, waxa aanu la wadaagi doonaa xubnaha shaqaalaha ee ay khuseyso.

**Cabasho hadal ah**
Haddii aad rabto inaad cabasho afka ah ka soo gudbiso wax xun oo aad la kulantay, waxaad walaacaaga la wadaagi kartaa qofka ku siinaya daryeelka ama xubin shaqaale oo kale. Waxay isku dayi doonaan inay ku caawiyaan islamarkaaba, oo hadday suurtogal tahay, muddo 48 saacadood gudahood ah.

**Cabasho rasmi ah**
Haddii qofka shaqaalaha ahi kaa caawin kari waayo in cabashadaada lagu xalliyo muddo 48 saacadood ah ama haddii aad damacdo inaad soo gudbiso cabasho rasmi ah oo qoran, Sarkaalka Cabashada HSE ayaalaga dalban inay xaaladda fiiriyaan.

Sarkaalka Cabashada HSE waxa laga yaabaa inuu kugula soo xiriiro 2 maalmo shaqeed gudahood ka dib markuu helo cabashadaada rasmiga ah ee qoran si uu macluumaad dheeraad ah u helo ama u xalliyo.

Sarkaalka Cabashada HSE muddo 5 beri gudahood ah ayuu si rasmi u xaqiijin doonaa inuu helaycabashadaada.

Haddii baaritaan loo baahan yahay, Sarkaalka Cabashada HSE wuxu cabashadaada kaga soo jawaabi doonaa muddo 30 maalmo shaqeed ah.

Haddii ay u baahdaan waqti dheeraad ah oo baaritaan lagu sameeyo, Sarkaalka Cabashada ayaa kugu soo wargelin doona tan ka hor muddada 30ka beri ah. Sarkaalka Cabashadu wuxu kugus oo warcelin doonaa 20kii maalmo shaqeedba mar is uu kuugu sheego waxa socda.

Your Service Your Say

Haddii aadan ku faraxsanay natiijada baaritaanka Sarkaalka Cabashada ee cabashadaada rasmiga ah, waxaad HSE ka codsan kartaa inay **qiimeyn** gudaha ah sameyo.

Haddii aadan ku qancin natiijada qiimeynta gudaha ee HSE, waxad codsan kartaa qiimeyn dibadeed madax-bannaan adiga oo la xiriiraya:

- Xafiiska Baaraha madaxa-bannaa (www.ombudsman.ie) **or**
- Baaraha madaxa-bannaan ee kiisaska Carruurta haddii aad ka yartahay 18 sannadood jir (www.oco.ie)

Wax badan oo ku saabsan siyaasadda jawaabcelinah waxaad ka akhrin kartaa, Adeegaaga Ra'yigaaga ee bogga **www.hse.ie/yoursay**

## Nala soo Xiriir

La **hadal** qofka ku siinaya daryeelka ama xubin shaqaalaha ah.

Iimayl noogu soo dir y**oursay@hse.ie**

**Buuxi** foomka ku lifaaqan xaashidan

**Booqo www.hse.ie/yoursay** si aad u buuxiso foomka onlaynka ah ee Adeegaaga Ra'yigaaga.

**Adeegaaga Ra'yigaaga HSE** si bilaash ah uga wac lambarka 1800 424 555 laga bilaabo 9am - 5pm Isniin illaa Jimce (marka laga reebo fasaxyada ciidaha). Soo wac +353 1 642 4555 haddii aad joogto Ireland dibadeeda

**Kooxdeena HSELive** ka soo wac taleefanka 1800 700 700 laga bilaabo 8subaxnimo - 8galabnimo, Isniin illaa Jimce iyo min 9ka subaxnimo - 5ta galabnimo maalmaha Sabtida (marka laga reebo fasaxyada ciidaha). Soo wac +353 1 240 8787 haddii aad joogto Ireland dibadeeda

**Cinwaanka Boostada:** HSE Your Service Your Say, Oak House, Limetree Avenue, Millennium Park, Naas, Co. Kildare, W91 KDC2

**Faallo:**
Sidee baanu isu horumarin karnaa?

**Bogaadin:**
Maxaad ka heshay ama la dhacday?

**Cabasho:**
Ma faraxsanid miyaa? Noo sheeg!

Iskaanka saar si aad u hesho maalmo dheeraad ah

# **Foomka Jawaabcelinta** Adeegaaga Ra'yigaaga

Your Service Your Say

Haddii aad jeclaan lahayd inaad bixiso jawaabcelin ku saabsan dhinac kasta oo adeegyadeena ah, fadlan buuxi foomkan oo noo soo dir

**Ku buuxinta foomka elegtaroonig ahaan**

Haddii aad rabto inaad wax isbeddel ah ku sameyso foomka, waa inaad isticmaasho noocyada dambe ee Adobe Acrobat Reader

**Adobe Acrobat Reader bilaash kagala soo deg adobe.com**

**Ku soo dirista foomka jawaabcelinta iimayl ahaan**

Waxa aanu ku talinaynaa inaad foomka PDF-ka ah buuxiso adigoo isticmaalaya laabtoob ama kombiyuutar.

Haddii aad rabto inaad isticmaasho taleefan casri ah ama taableed, waa inaad isticmaasho ablikeyshanka tifatiri kara PDF-ka oo kuugu jira aaladda aad isticmaaleyso

1. Foomka kula soo deg taleefankaaga.
2. Foomka ku fur tifatiraha PDF-keenna.
3. Dhammeystir oo kaydi foomka. Haddii aad isticmaalayso moobeel, hubi in dhammaan xogta foomku si sax loo kaydiyay.
4. Foomka iimayl ahaan ugu dir **yoursay@hse.ie**

**Ku soo dirista foomka jawaabcelinta boostada**

1. Daabac oo buuxi foomka (fadlan si waadax ah u qor ama FAR WAAWEYN KU QOR).
2. Boostada soo dhig cinwaanka: HSE Your Service Your Say, Oak House, Limetree Avenue, Millennium Park, Naas, Co. Kildare, W91 KDC2

Fadlan ku qor nooca jawaabcelinta aad rabto inaad bixiso:

Faallo bixiyo ☐ Bogaadin diro ☐ Cabasho gudbiyo ☐

**Magaca adeegga:**

**Magaca goobta:**

(tusaale xarunta caafimaadka, xafiiska maamulka, isbitaalka ama xarunta caafimaadka ama waadhka isbitaalka ku yaalla)

**Taariikhaha mahadhooyinka jawaabcelintani la xiriirto:**

Fadlan tafaasiisha jawaabcelintaada halkan ku bixi:

**Foomka Jawaabcelinta** Adeegaaga Ra'yigaaga

Your Service Your Say

| | |
|---|---|
| **Magacaaga:** | |
| **Cinwaanka:** | |
| **Iimaylka:** | |
| **Taleefan:** | |
| **Moobeel:** | |
| **Taariikh:** | |

Haddii jawaabcelintaadu tahay cabasho, waxa laga yaabaa in aanu u baahano inaanu helno macluumaadkaaga shaqsiga ah, balse keliya waa mararka loo baahdo iyo keliya xogaha la xiriira cabashadaada.

Haddii aadan **rabin** in **macluumaadka** shaqsiga ah ee HSE hayso la heli karo:

**Fadlan dooro:** **Haa** ☐ **Maya** ☐

## Loogu Talagalay Shaqaalaha HSE oo Keli ah

| | |
|---|---|
| Taariikhda la helay: | |
| Lambarka Faallada / Bogaadinta / Cabashada: | |
| Goobta: | |
| Sarkaalka Cabashada: | |